

DUGSIGA FURAN

Dugsiga furan waa barnaamij kombiyuutareed ee loogu talagalay waalidiin ay carruurtooda u dhigato fasallada diyaarinta ee degmada iyo dugsiyada hoose-dhexe. Barnaamijka wuxuu sahlayaa wada xiriirka dugsiga iyo waalidka.

Sida aad ku galeyso barnaamijka

Laba siyaabood ayaad ku gali kartaa Dugsiga Furan. Adigoo adeegsada sms ama aqoonsigaaga kombiyuutareed (e-legitimaiton). Si aad furaha sms galidda barnaamijka ugu adeegsato waa inaad marka hore akawn waalid yeelataa.

Sida aad ku furaneyso akown waalid

Haddaadnan wax akawn ah laheyn waxaad ka codsan kareysaa boggaan www.hanninge.se/Barn--Utbildning/Den-oppna-skolan. Isku xiriiryada midigta kaaga soo baxa ka guji *Ansök om föräldrakonto* (Codso akawn waalid). Taxanaha ciirran ee kuu soo baxa ka dooro *kontohantering* (akawn maamulid).

Fure sms

Si aad furaha sms galidda Dugsiga Furan ugu adeegsato waa in teleefankaaga gacanta lambarkiisa uu yahay mid aad ka diiwangelisay hab-kombiyuutareedka. Adigoo adeegsanaya akawnkaaga waalid gal hab-kombiyuutareedka. Ku qor lambarka teleefankaaga gacanta *Min profil – adressändring* (Astaamaheyga – cinwaan beddel). Haddii lambarka teleefankaaga gacanta uu yahay mid ka diiwangashan hab-kombiyuutareedka, waa inuu furahaaga sms kuu shaqeyaa. Lambarka teleefanka gacanta waxaad u qori kartaa laba siyaabood. Eeg masaallada soo socda 0707-123456 ama +467030123456. Furaha sms waxaad isticmaali kareysaa hal maalin gudaheed ka dib markaad lambarka teleefanka ka diiwangeliso hab-kombiyuutareedka.

Isticmaalka furaha sms oo talaabo-talaabo ah

1. Fur internetka
2. Goobta cinwaannada ku qor www.hanninge.se/inloggning
3. Dooro *SMS-inloggning* (Fure SMS)
4. Qor magacaaga isticmaalka iyo furahaaga
5. Guji *Submit*
6. SMS (fure mar-istimaal ah) ayaa teleefankaaga lagu soo dirayaa
7. Furaha ku qor qaanadda ku ag taal OTP
8. Guji *Submit*, waad gashay barnaamijka.

Adeegsi fure e-legitimation (aqoonsi koombiyuutareed)

Waxaad aqoonsigaaga koombiyuutareed ka soo dejisan kartaa bangigaaga ama Telia.